Landstinget i Östergötland

Tandvård/SOM

Daryeelka ilkaha

Haddii aanad Af Iswiidhishka si fiican u aqoonin, waxa aad xaq u leedahay turjumaan.

Afkaaga iyo ilkahaagu waxa ay u baahanyihiin caawimadaada iyo caawimadayada labadaba si ay u sii caafimaad qabaan.

Daryeelka ilkaha dadweynuhu waxa uu kaa caawinayaa arrimo kala duwan oo la xidhiidha daryeelka ilkaha, markaa innaga oo iskaashanayna ayeynu helaynnaa xal u gaar ah daryeelka ilkahaaga. Daryeelka ilkaha dadweynuhu waxa uu leeyahay goobo quseeya daryeelka ilkaha ee guud, isbitaalka daryeelka ilkaha iyo takhasus gaar haaneed oo daryeelka ilkaha ah.
Daryeelka ilkaha dadweynaha waad dooran kartaa goobta iyo diktoorkaba.

Waxa aanu ku leenahay xaafado badan oo gobolka ka mid ah goobo dakhtar ilkood ah. Nus in ka badan dadka gobolka, waxa ay doorteen in ay daryeelkooda ilkaha ka helaan, Daryeelka ilkaha dadweynaha. Waxa aanu leenahay qiyaastii 630 shaqaale ah oo la kulma dad ka badan 150 000 oo bukaan ah sanad kasta.
Waxa aad naga helaysaa diiwaanka telefoonada qaybta jaallaha ah iyo qaybta buluugga ah labada, ciwaanka ah; dhakhtarka ilkaha, waxa aad ka sii fiirisaa Daryeelka ilkaha dadweynaha.

Daryeelka ilkaha ee guud
Waxa aanu ku leenahay gobolka oo dhan 32 goobood oo daryeelka ilkaha ee guud ah. Haddii aad rabto in aad timaaddo Daryeelka ilkaha dadweynaha, waxa aad la soo xidhiidhaysaa goob daryeelka ilkaha ee guud ah, halkaas oo aad ka helayso daryeel ka hortegid ah, baadhitaan iyo wax ka qabad. Goobahayaga daryeelka ilkuhu waxa ay ku xidhanyihiin Qasnadda caymiska, taas oo macneheedu yahay in qayb ka mid ah qarashkaagii daryeelka ilkaha ay bixinayso Qasnadda caymisku. Daryeelka ilkaha dadweynuhu waxa uu leeyahay liisto xagga qiimaha ah oo lagu dhaqmo dhammaan goobaha daryeelka ilkaha.

Ma rabtaa in lagu daryeelo? Isu sheeg goobta daryeelka ilkaha ee aad rabto in aad tagto, fiiri www.lio.se qaybta daryeelka ilkaha.

Khabiirka daryeelka ilkaha
Landstinget ayaa masuul ka ah khabiirka daryeelka ilkaha ee gobolka. Khabiirka daryeelka ilkuhu waa dhammaystirka daryeelka ilkaha ee guud iyo daryeelka ilkaha ee gaarka loo leeyahay. Waxa mar walba loo baahanayaa in ay kusoo wareejiyaan daryeelka ilkaha ee guud ama dhakhtarka ilkaha ee gaarka loo leeyahay

Dadka qaba dhibaatooyin waaweyn oo wejiga ah iyo bukaannada u baahan qalliin weyn oo daamanka ah si wax looga qabto dhaawaca ilkaha iyo daamanka, waxa ay caawimo ka helayaan khabiirrada dhakhtarka daamanka ee isbitaalka jaamacadda Linköping. Halkaa waxa dadka looga soo diraa xiitaa gobollada kale.

Landstinget i Östergötland

Tandvård/SOM

Waxa jira tiro badan oo xarumo khabiirro ah gobolka dhexdiisa. Waxa ay ku takhasuseen waxayaalaha afka lagu rakibo (ilkaha beenta ah), xannuunada ilkaha soo rida, dhibaatooyinka daamanka, wax-ka-qabadka ilkaha qotadooda, xakamaynta ilkaha iyo weliba pedadonti oo wax ka qabta dhibaatooyinka culculus ee ay huuradu ku keento ciyaalka. Khabiirka daryeelka ilkuhu waxa kale oo ay ka shaqeeyaan cilmi-baadhis iyo horumarinta qaababka cusub ee daweynta iyo weliba dib wax u baridda iyo wax sii baridda shaqaalaha Daryeelka ilkaha dadweynaha.

Daryeelka ilkaha ee isbitaalka
Bukaannada wax lagaga qabto Daryeelka ilkaha ee Isbitaalka, badiyaa waa bukaannada halista ah marka laga fiiriyo dhinaca daryeelka ilkaha, xanuun am daaweyn dartii. Daryeelka ilkaha ee Isbitaalka ee Östergötland waxa uu ka jiraa goobo ku yaal Åleryd iyo Isbitaalka jaamacadda ee Linköping, Isbitaalka Motala iyo weliba dhakhtarka Vrinnevisjukhus ee Norrköping. Goobahaas daryeelka ilkaha waxa jooga shaqaale aqoon gaar ah u leh in ay wax ka qabtaan dhibaatooyinka afka ee dadka kansarka qaba, dadka shilalka ku dhaawacmay, bukaan socodka gabow dartii iyo bukaannada qaba cudurada infekshanka leh. Waxa xiitaa jira goobo daryeelka ilkaha ka mid ah oo ay joogaan shaqaale aqoon gaar ah u leh in ay daryeel ilkood siiyaan dadka korriinkoodu kala dhantaalanyahay iyo kuwa maskaxda ka jirran.

Daryeelka ilkaha ee degdegga ah
La xidhiidh marka ugu horraysa dhakhtarkaaga ilkaha ama wac heeganka Daryeelka ilkaha dadweynaha ee telefoonka 112. Maalmaha caadiga ah waxa la wici karaa 08.00-16.00, sabtida, axadda iyo fasaxyadana waa 08.00-14.00, markaa waxa laguu tilmaamayaa dhakhtarka ilkaha ee heeganka ah ee kuugu dhow.

Dhaawacyada ilkaha iyo daanka ee khatarta ah
Marka ay jiraan dhaawacyo khatar ah oo ilkaha iyo daamanka ah iyo xaaladaha adag ee degdegga ah, waxa laguu tilmaamayaa Isbitaalka jaamacadda ee Linköping.

Ma ka baqdaa dhaktarka ilkaha? Markaa wac 020-86 19 19 si aad u hesho caawimo.
Ma waxad u aragtaa wax aan fiicnayn in aad u tagto dhakhtarka ilkaha? Arintaas keli kuma tihid! Iswiidhan tobankii qof ee waaweynba mid ayaa qaba ka baqashada dhakhtarka ilkaha. Ka baqashada dhakhtarka ilkuhu wuxu ku dhacaa rag iyo dumar, carruur iyo waayeel. Waxa ka jira daryeelka ilkaha dadweynaha ee gobolka oo dhan, dhawr kooxood oo daryeelka ilkaha ah oo gaar uga shaqeeya ka baqashada dhakhtarka ilkaha. Kooxahaasi waxa ay leeyihiin aqoono kala duwan – laga bilaabo gacan qabasho wanaagsan oo cilmi-nafsi ah ilaa suurtagalnimada in ay kuu sameeyaan maddiido, gaasta xanuun biinta ama suuxin.

Dhakhtarka ilkaha ee gaarka loo leeyahay
Magacyadooda waxa aad ka helaysaa diiwaanka landstinget-ka iyo bogagga jaallaha ah ee diiwaanka Eniro.

Khidmadaha
Qarashka booqashada dhakhtarka ilkuhu waxa uu ku xidhanyahay hawsha lagaa qabanayo.

Landstinget i Östergötland

Tandvård/SOM

Daryeelka ilkuhu waa u bilaash carruurta iyo dhalinyarada
Waa xor in uu doorto Daryeelka ilkaha dadweynaha ama dhakhtarka ilkaha ee gaarka loo leeyahay. Waalidiinta leh carruur buuxinaysa saddex jir iyo kuwa dhawaan soo guuray waxa ay helayaan warbixin qoran oo arinkaas ku saabsan. Markasta doorashadaas waa la bedelan karaa. Dhammaan daryeelka ilkaha ee caadiga ah oo uu ku jiro khabiirka daryeelka ilkaha, waa u bilaash dhammaan ilaa sanadka ay buuxinayaan 19 jir. Wax ka qabashada aan lagu sababayn baahi cad oo daryeel ilkood, qofka ayaa iska bixinaya.

Khidmadaha dadka waaweyn
Dhakhtarka ayaa go´aaminaya qiimaha daryeelka ilkaha. Marka aad bixinayso, waxa lagaa jarayaa qaybtii ay bixinaysay Qasnadda caymisku.

Daryeelka ilkaha ee la raadsanayo iyo daryeelka ilkaha ee lagama maarmaanka ah ee dadka waayeelka ah iyo dadka laxaadkoodu kala dhantaalanyahay.
Laga soo bilaabo 1999 dadka waayeelka ah iyo kuwa laxaadkoodu kala dhantaalanyahay ee baahi weyn u qaba xannaanayn shakhsi ah, waxa ay xaq u leeyihiin raadsasho daryeel ilkood oo bilaash ah, kaas oo ka kooban caafimaadka afka oo si shakhsi ah loo qiimeeyo. Wax ka qabashada daryeelka ilkaha ee loo arko lagama maarmaan waxa aad bukaan ahaan bixinaysaa khidmadahan soo socda markii wax lagaa qabtaba:
Daryeelka ilkaha ee guud ……..150 kr
khabiirka daryeelka ilkaha ……..300 kr
Kalkaalisada ilkaha/Ilko nadiifiye ...….100 kr

Khidmadahaas waxa lala xisaabinayaa qarashaadka bukaanka ee lagu bixiyey daryeelka caafimaadka ee furan. Waxa jiraya difaaca qarashka badan ee ah 900 kr. Xiitaa halkan waxa la kala dooran karaa Daryeelka ilkaha dadweynaha iyo daryeelka ilkaha ee gaarka loo leeyahay

Kuwa ay arrintaasi qusaysaa waa
• Dadka degen deegaan khaas ah
• Dadka guriga ku hela daryeel caafimaad oo badan ee soo gelaya sharciga daryeelka khaaska ah iyo u adeegga dadka laxaadkoodu kala dhantaalanyahay qaarkood (Sharciga LSS)
• Dadka degen guri u gaar ah isla markaana qaba baahi daryeel iyo xannaano u dhiganta ta kooxahaas kor ku xusan

Dadkaas waxa la siinayaa warqad caddayn ah oo ay bixinayaan shaqaalaha xannaada dadka waaweyn iyo naafada ee dagmooyinku. Xiitaa shaqaalaha xarumaha xannaanada caafimaadka, kuwa cudurada maskaxda, kuwa dhaqancelinta isbitaallada qaarkood waa ay samayn karaan warqadda caddaynta ah. Warqaddaas caddaynta ah ayadoo laga duulayo waxa ay landstinget soo saaraysaa kaadh dhakhtarka ilkaha ah.

Daryeelka ilkaha ee qaybta ka ah waxqabad xanuun oo kooban oo ah wakhti xaddidan
Xaaladaha xanuun qaarkood, wax ka qabadkooda waxa ku jira daryeel ilkood. Dhakhtarka wax daweynaya oo la tashanaya dhakhtarka ilkaha ayaa arinkaas go´aan ka gaadhaya. Markaas waxa looga baahanayaa dhakhtarka wax daweynaya in uu u wareejiyo dhinaca dhakhtarka ilkaha. Adigu

bukaan ahaan waxa aad bixinaysaa qarashka lagu bixinayo daryeelka ilkaha ee lagama maarmaanka ah ee waayeelka iyo dadka laxaadkoodu kala dhantaalanyahay.

Qalliinka daanka
Marka waxqabad qalliin lagu samaynayo daanka, waxa badiyaa la bixinayaa qiimaha daryeelka ilkaha oo kale. Taasi waxa ay dhacaysaa tusaale ahaan marka la saarao gawska xikmadda. Mararka qaarkood oo waxqabad qalliin oo adag lagu samaynayo afka waxa aad bixinaysaa qiimaha lagu bixiyo marka dhakhtar lagula kulmayo isbitaal taas oo ah 300 kr.

Ka baqashada dhakhtarka ilkaha ee xad-dhaafka ah
Haddii aad si xad dhaaf ah uga baqdo dhakhtarka ilkaha waxa jira fursad aad taageero kaga helayso dhakhtar cilmi nafsi inta aan la bilaabin waxqabadka daryeelka ilkaha, taas oo qayb ka ah wax ka qabashada baqaha dhakhtarka ilkaha. Markaa waxa aad bixinaysaa qarashka bukaanka iyadoo la raacayo sharciyada daryeelka ilkaha qaybta ka ah waxqabad xanuun oo kooban oo ah wakhti xaddidan. Kala hadal arinkaas dhakhtarkaaga ilkaha.

Xuquuqda lagu leeyahay dhakhtarka ilkaha
Waxa aad xaq u leedahay in aad ogaato qarashka kugu baxaya inta aanu daryeelku bilaaban, laakiin dhakhtarka ilkuhu waxa uu xaq u leeyahay in uu qarash ku qaato baadhitaanka iyo qiimaynta. Dhakhtarka ilkuhu wuxu warbixin kaa siinayaa hababka waxqabad ee jira iyo sida uu yahay caafimaadkaaga ilkuhu.